

Qarash Wadaaga: Su'aalaha Badanaa La isweydiyo

(Cost Share: Frequently Asked Questions)



Dokumentigaan waxay ka jawaabaan su'aalaha caadiga ah ee ku saabsan qarash wadaaga. Warbixinta adiga ayay quseyn kartaa haddii aad iska diiwangelisid barnaamijka daryeelka muddada dheer ee Medicaid, sida:

- Family Care.
- Partnership.
- IRIS (Include, Respect, I Self-Direct) (Ku dar, Ixtiraam, Aniga Is Hago).
- PACE (Program of All-Inclusive Care for the Elderly) (Barnaamijka Dhammaan Daryeelka Loo dhanyahay ee Waayeelka).

Waa maxay qarash wadaaga?

Qarash wadaaga waa cadad bil-le ah oo xubnaha qaar iyo ka qeybqaatayaasha laga yaabo inay bixiyaan si ay ugu sii qalmaan barnaamijka daryeelkooda muddada dheer ee Medicaid.

Sidee ayaa qarash wadaageyga loo xisaabiya?

Income maintenance agency (wakaalada ilaalinta dakhligaaga) ayaa go'aansaneyso cadadka qarash wadaagaaga ka hor intaadan iska diiwaangelin barnaamijka daryeelka muddada dheer. Inta aad bixisid waxay ku saleysantahay arimo badan. Tusaalooyinka hoos ku qoran ma ahan arimahoo dhan ee laga yaabo inay quseyso.

- Daqligaaga guud—Imisa lacag ah ayaad heshaa canshuuraha ka hor ama waxyaabaha kale ee laga jaro?
- Xaalada guurka—ma leedahay sey helaa daqli?
- Halkee ayaad ku nooshahay—Waa imisa qarashaadka gurigaaga?

Goorma ayaan bixiyaa qarash wadaageyga?

Haddii aad leedahay qarash wadaag, waa inaad bixisaa bil walba. Lacag bixinta qarash wadaaga waxaa la sugayaa bisha aad iska diiwaangelisid Family Care, Partnership, IRIS, ama PACE.

Lacag bixinta waa la rabaa xattaa haddii aad heshid adeegyada qeyb ka mid ah bisha koowaad. Sharcigaan wuu quseeyaa iyadoon laga eegin taariiqdaada diiwaangelinta.

Yaa helo lacag bixinta qarash wadaaga?

Iyo Family Care, Partnership, iyo PACE, waxaad ku soo direysaa lacag bixinta qarash wadaagaaga Managed Care Organization (Ururka Daryeelkaaga La maareeyay). Iyo IRIS, waxaad ku soo direysaa lacag bixinta qarash wadaaga IRIS fiscal employer agent (hay'adaada badrooniga maaliyada IRIS).



Maxaa ku dhaco qarash wadaageyga haddii aan doorto barnaamijka cusub ee daryeelka muddada dheer?

Waad badelan kartaa barnaamijyada, managed care organization (hay'ada daryeelkaaga la maareeyay), IRIS fiscal employer agent (wakiilka badrooniga maaliyada IRIS), ama IRIS consultant agency (hay'ada la talinta IRIS). Si loo sameeyo isbadel, la hadal ADRC-gaaga (aging and disability resource center) (xarunta illaha gabowga naafada) ama Tribal ADRS (aging and disability resource specialist) (taqasuska illaha gabowga iyo naafada). Waxay ku ogeysiinayaan waxa la sameeyo.

Haddii aad isbadel ku sameysid bartamaha bisha, oo aad horay u bixisay qarash wadaagaaga bisha, looma baahno inaad bixisid markale. Lacag bixinada qarash wadaaga waxaa la aruuriyaa kaliya hal jeer bishiiba.

Qoraalada:

